

Cabbirada Meeha Baabuur-joojinta iyo Saldhigyada Lacag Bixinta

Xog guud, Qiimaha, iyo Lacagta laga bixinayo meesha Baabuur-joojinta ee Maalmaha

Saldhigyada Lacagta lagu bixiyo: Tilmaamo dagdag ah

Saldhigyada Lacagta Lagu Bixiyo: Xog Guud

Waxay Waaxda Gaadiidka ee Seattle (SDOT) ku-ballanqaadday in baabuur-joojinta waddooyinka u maarayso si ay u abuurto isticmaalka ugu wanaagsan ee meelaha baabuurta la joojiyo ee xaddadan ee qararka waddooyinka ee magaalada Seattle iyo dagmooyinka uu ganacsigu ka socdo. Hababka taas lagu hanan karo waxaa ka mid ah isticmaalidda qalabyada lacagtooda hore loo bixiyay ee sida saldhigyada lacag bixinta. Waqtigan xaadirka ah waxay magaaladu leedahay illaa 10,400 oo meelood oo baabuurta la joojiyo oo lacagtooda hore loo bixiyay, oo ku yaalaa magaalada gudaheeda iyo damooyinka uu ganacsigu ka socdo ee u dhodhow. Sanadkii 2004-tii waxay magaaladu bilowday in ay cabbirada meelaha baabuur joojinta ee halka-meel ah intooda badan ku-beddesho saldhigyada lacag bixinta.

Ujeedo

Ujeedooyinka adeegyada meelaha baabuur-joojinta waxaa ka mid ah kuwan hoose:

1. Waxay goobaha ganacsiga tafaariiqda iyo ganacsiyada kale ka abuuraysaa meelo baabuur-joojin oo waqti gaaban ah (gaar ahaan meelaha calaamadaha waqtiga la xadeeyay ayna dhiiri-gelinayn in si dhaqso ah baabuurta loogaga dhaqaajiyo).
2. Waxay dhiiri-gelinayaan in qararka waddooyinka laga helo meelo baabuurta la joojiyo oo ku-filan isticmaalayaal kala-duwan, hab firfircoon oo loo isticmaalo adeegyada baabuur-joojinta ee waddooyinka qaadi lahaa isticmaalka gudbinta (transit) iyo fursadaha kale ee gaadiidka.
3. Waxay wanaajirnaan socodka baabuurta, waxayna goobaha ganacsiga muhiimka ah u kordhinayaan tirada dadka baabuurta ku imanaya.
4. Waxay dakhil u soo saarayaan magaalada Seattle. 2002-dii gaadiidka, dabka, booliiska, adeegyada bulsheed iyo ujeedooyinka kale ee dawliga ah loo ururiyay lacag gaadhaysay \$15.2 milyun.

Cabbirada Meelaha Baabuurta la Joojiyo iyo Qiimayaasha Saldhigga Lacagta lagu Bixiyo

Dhammaan meelaha baabuur joojinta ee lacagta laga bixiyay ee magaalada Seattle ka-dhex shaqaynaya, marka laga reebo South Lake Union, qiimahoodu halkii saacba waa \$1.50. Qaabka qiimuhuna waa sidan soo socota:

- 2 daqiiqo = \$0.05
- 4 daqiiqo = \$0.25
- 10 daqiiqo = \$ 1.00
- 40 daqiiqo = \$ 1.00
- 60 daqiiqo = \$ 1.50

Marka ay 2007-da SDOT ay South Lake Union ka bilowdo qotominta saldhigyada lacag-bixinta, waxaa jiri doona 2-saac oo baabuur joojin lacag laga bixiyay oo uu qiimaheedu halkii saacba noqon doono \$1.25, maalin-welbana ay ka jirayso illaa 10 saacadood oo baabuur joojin ah oo halkii saacba uu qiimaheedu noqon doono \$ 0.75. Xog dheeraad ah [meeshan waa la heli karaa](#).

Saacadaha Hawl-gelka

Cabbirka meesha baabuur joojinta ee magaalada iyo saacadaha saldhigga lacag -bixintu, guud ahaan waa Isniinta illaa Sabtida inta u dhaxaysa 8:00 AM illaa 6:00PM (dhammaan cabbirada ka jira meelaha baabuur joojinta ee magaalada iyo saldhigyada lacag bixintu Axadda waa bilaa lacag). Waxaa jira meelo baabuurta la joojiyo oo ay cabbirada iyo saldhigyada lacagta lagu bixiyo ay bilaabmaan 9:00 AM. Meelahani waxay yihiin meelaha ay baabuur joojinto xadaysantahay ee aroortii uu socodka baabuurta uu aad u badanyahay (Lama oggola in baabuurta la joojiyo 7:00 AM - 9:00 AM). **Haddii uu shaki kaaga jiro cabbirka ama saldhigga lacag bixinta naftirkiisa, waxaanad ka heil doontaa saacadaha iyo maalmaha ay shaqaynayaan ee daabacan ee cabbirkaa/goobta saldhigga.**

Maalmaha baabuur-joojinta bilaa lacagta ah

Dhammaan Axadaha

1-da January

Isniinta Saddexaad ee January

Isniinta Saddexaad ee February

Isniinta ugu-dambaysa ee May

4-ta July

Isniinta ugu horaysa ee September

11-Ka November

Khamiista afraad ee November

25-ka December

Haddii aad la kulantid **cabiir meesha baabuur joojinta ah ama saldhig lacag bixin oo aan shaqaynayn** oo ku dhex yaalla magaalada Seattle, 24-ka saac ee maalinta **waxaad soo wacdaa (206) 684-5260** si aad u soo wargelisid.

Ma labeddeli karaa dhararka waqtiga ama nooca meesha baabuur-joojinta ee lacagta laga bixiyay ama isticmaalka meelaha qararka waddooyinka ee goobtayda? Dadka hantiilayaasha ee ku dhaggan meelaha baabuur-joojinta ee lacagta laga bixiyay (cabbirada ama saldhigyada lacag bixinta) way la soo xidhiidhi karaan SDOT si ay u raadiyaan fursad lagu beddeli karo isticmaalka meelaha qararka waddooyinka ku yalla. Waxaa kuwan ka mid noqon kara in dib-u-habayn lagu sameeyo waqtiga ugu dheer ee meesha baabuurta la joojiyo ee lacagta laga bixiyay, qotominta, ama ka-qaadidda, ama beddelidda nooca goobta uu culayska adeeggu ka jiro ee ku xiga ama la dariska ah hantida. Waxaa laga fiirsanayaa saamayn-kasta oo dhinaca isticmaalka dhulka la dariska ah iyo baahida weyn ee dhinaca gaadiidka ee ka jirta sakadaha ku-wareegsan iyo/ama wadiiqooyinka ee kaga iman karta isbeddel-welba oo la samaynayo.

Maxaan sameeyaa haddi aan iskudayo in aan baabuurkayga joojiyo oo aan ogaado in uu cabbirka meesha baabuur joojinta iyo saldhigga lacagta lagu bixiyo uu ciladaysanyahay?

Sharciga Dawladda Hoose ee Seattle (SMC 11.76.010) wuxuu dhigayaa in ay sharci darro tahay in la isticmaalo meel baabuurta la joojiyo oo uusan shaqaynayn cabbirka meesha baabuur joojinta ama saldhigga lacag bixinta ee ku agyaalla uusan shaqaynayn. Haddii aad la kulantid cabbir ama saldhig lacagta lagu bixiyo oo aan shaqaynayn oo ku dhex yaalla magaalada Seattle, fadlan **soo wac (206) 684-5260** oo soo wergeli. SDOT waxay ka xuntahay rafaadka aad kala kulantay cabbirka ama saldhigyada lacag bixinta ee aan shaqaynayan, waxayna u dayactiraysaa sida ugu dhaqsaha badan.

Midababda Cabbirka Meesha Baabuurta La-joojiyo

Magaalada Seattle waxay isticmaashaa cabbiro uu midabka qubkoodu kala-duwanyahay si cabbirada loogu maareeyo sidan hoos ku-qeexan:



Qubka Buluugga wuxuu macnihiisu yahay in baabuurka addeeggu (Service) uu meeshan isticmaali karo. Baaburta adeeggu waxay mararka qaarkood ubaahanayaan in ay joogsadaan meel u dhow goobta soo wicidda adeegga, sidaa-awgeed waxay shirkaduhu heli karaan shati lacag lacag laga bixinayo oo u saamaxaya in ay isticmaalaan cabbirada qubka buluugga leh. Si aad u heshid xog dheeraad ah oo ku-saabsan shatiga baabuurka adeegga **soo wac (206) 684-5086**.

Qubka Huruudda wuxuu macnihiisu yahay "Baaburta lama- joojin karo 7:00 AM illaa 6:00 PM, Isniinta-Sabtida." Waxaa cabbirka qubka midabkan leh loo isticmaalaa si loo aburo Goob aan si [ku-meelgaadha baabuurta loo joojin karayn](#), markaa baabuur-kasta oo saacadaha huruudda ah lagu tilmaamay la joojiyo wuxuu khatar ugu jiraa in loo jaro tigidhka baabuur joojinta. Waxaa meeshan oo kale baabuurta la joojin karaa fiidkii wixii ka dambeeya 6 PM (ama Axadda), waxayna noqonaysaa in ay 7 AM ka-hor ay goobtaa ka dhaqaajiyaan. Si aad xog dheeraad ah u heshid **soo wac (206) 684-5086**.



Qubka Casaanka wuxuu macnihiisu yahay "[Goota Baaburta Laga Jiido](#)", waxaa baabuur-kasta oo la joojiyo meesha uu yaallo cabbirka qubka cas uu khatar ugu jiraa in tigidh loo jaro, in goobtaa laga jiido iyo in lala wareego. Si aad u ogaatid in baabuurkaaga la jiiday waxaad **soo wacdaa (206) 684-5444** (Waxda Booliska ee Seattle). Gaar ahaan waxaa cabbirada qubka cas isticmaala qandaraaslayaasha ay u socdaan mashaariicda dhismuhu. Si aad xog dheeraad ah u heshid **soo wac (206)654-5086**.